



# KATAXADAR IN AANAN GAARIGA LAGAA JIIDIN XILIGA QABOBAHA/ BARAFKA

Marka lagu dhawaaqo xaaladda degdegga ah ee baraf-xaaqista, fadlan raac shuruucda baarkinada si looga xaaqo barafka waddooyinka.

In laxaaqo waddada gebi ahaanteedu waxay muhiim utahay gawaadhida bad-demiska, booliska, ambalaaska iyo qofkasta oo mara wadada – hadday tahay ku kumaraya gaadhi, bus, baaskiil amaba lug. Haddaba si loo xaaqo wadada, waxaa loo baahanyahay in gawaadhida la qaado. Fadlan qaybtaada ka soo bax iskana ilaali in tigidh lagu siiyo ama lagaa jiido gaadhiga.

## SIDEE BAAN U OGAAN KARAA MARKA MAGAALADA MINNEAPOLIS AY KU DHAWAAQO XAALADA DEGDEGGA EE BARAFKA?

- ▶ Wac taleefankan ah **348-SNOW (7669)**.  
(Wacayaasha TTY waxay isticmaali karaan Addeega Gudbinta ee MN ama waxay waci karaan 612-673-2157.)
- ▶ Booqo **[www.minneapolismn.gov](http://www.minneapolismn.gov)**.
- ▶ Daawo TV-yada magaalada ama kan magaalada Minneapolis ay leedahay (Camcast janalka 859 ama CenturyLink janalka 8502), ama dhegayso radhiyowga.

### Is Qor

Is qor si aad u heshid fariin qoraal ah, iimeyl digniin ah ama wacid talefoon Deegaanka ayaa kula soo socodsiiyaya marka Xaalad Degdegga ee Barafka lagu dhawaaqo. Iska diiwaan geli **[www.minneapolismn.gov/snow](http://www.minneapolismn.gov/snow)**.

### Ka fiiri

Meel aad baabuurka dhigatid ka fiiri

**[www.minneapolismn.gov/snow/snowstreetlookup](http://www.minneapolismn.gov/snow/snowstreetlookup)**.


### Soo rogo

Usoo rogo Ayfoonkaaga iyo Andaroydkaaga saabka (aabka) Xaalada Degdegga ee Barafka.



**[www.minneapolismn.gov](http://www.minneapolismn.gov)** • Wac **348-SNOW (7669)**

# YAQIINSO MEELAHA BAABUURKA LA DHIGTO SADDEXDA MAALMOOD EE LAGU JIRO XAALADDA DEGDEGGA EE BARAFKA.



**Maalinta 1 aad**  
**9 Fiidnimo - 8 subaxnimo**

## Maalinta 1 aad

### 9 Fiidnimo - 8 subaxnimo (Waagu ugu baryo)

#### Xeerarka baabuur dhigashada ee maalinta 1aad

Xaaladda Degdegga ee Barafka waxaa lagu dhawaaqi doonaa ugu danbeyn 6-da maqribnimo ilaa iyo 9-ka fiidnimo ee maalintaas, Xeerarka baabuur dhigashaduna isla maalintaas ayay hirgelayaan.

**Samee**


Dhigo baabuurka labada dhanba dhamaan wadooyinka aanan ahayn kuwa Snow Emergency route ka ah, (Waddooyinka aan la surin calaamada cas ee oranaysa: Waddo ku sugan Xaaladda Dedega ee Barafka, ama la xaaqayo).



**Ha sameyn**

Ha dhigan baabuurka midna labada dhan ee Wadooyinka Snow Emergency route ka ah, Waddooyinkaasi waxaa lagu calaamadiyey calaamad cas oo oranaysa Waddo ku sugan Xaaladda Dedega ee Barafka (Waddo la xaaqayo) iyo calaamada waddada oo buluug ah. Waddooyinkaas ayaa marka hore la xaaqayaa.

SE 4th St



**Maalinta 2 aad**  
**8 da Subaxnimo ilaa**  
**8 fiidnimo**

## Maalinta 2 aad

### 8 da Subaxnimo ilaa 8 fiidnimo

#### Xeerarka baabuur dhigashada ee maalinta 2aad

**Samee**


Dhigo baabuurka dhanka kinsiga ah ee waddada aan loo astayn Waddada Xaaladda Degdegga ee Barafka (tusaale ahaan: guryaha cinwaankoodu yahay 1357 Maple ama 2513 17th Ave).

**Ha sameyn**

Dhigo baabuurka labada dhinacba dhankaad doontid ee ah waddada aan loo astayn inay tahay Waddada Xaaladda Degdegga ee Barafka.

Ha dhigan baabuurka dhanka dhabanka ah ee waddooyinka loo asteeyay inay yihiin Waddada Xaaladda Degdegga ee Barafka (tusaale ahaan: guriga cinwaankiisu yahay 1356 Maple ama 2512 17th Ave).

Ha dhigan baabuurka dhinacna labada dhinac ee jidadka.



**Maalinta 3 aad**  
**8 da Subaxnimo ilaa**  
**8 fiidnimo**

## Maalinta 3 aad

### 8 da Subaxnimo ilaa 8 fiidnimo

#### Xeerarka baabuur dhigashada ee maalinta 3aad

**Samee**

Dhigo baabuurka dhanka dhabanka ah ee waddada aan loo astayn Waddada Xaaladda Degdegga ee Barafka (tusaale ahaan: guryaha cinwaankoodu yahay 1356 Maple ama 2512 17th Ave).

**Ha sameyn**

Dhigo Baabuurka labada dhanba wadooyinka leh calaamada "Snow Emergency Route" sign.

Ha dhigan baabuurka dhanka kinsiga ah ee waddooyinka ann loo asteeyn inay yihiin Waddada Xaaladda Degdegga ee Barafka (tusaale ahaan: guriga cinwaankiisu yahay 1357 Maple ama 2513 17th Ave).

## ***Ka waran hadii Wadada Barafki laga xaaqay?***

Isla markii wadada si buuxda looga xaaqo Barafkaba, waxaad xor utahay inaad dhigato Baabuurka, xataa hadii wali uu dhaqan galyahay Sharicigii Baarkinka ee Xaalada Degdega ee Barafka. “si buuxda loo xaaqo” macnaheedu waxa weeye in waddada si dhameystiran loo baneeyay oo la xaaqay gebiahaanba balaceeda. Waxaa dhici karta in xaaqitaanka la sameeyo oo lagu celceliyo dhowr jeer, sidaa awgeed hubso in waddada gebi ahaanba la xaaqay inta aadan baabuurka dhigan.

## ***Maxaan yeelaa haddii baabuurka la iga jiito?***

Waxaad baabuurkaaga ka firin kartaa in la geeyay garaashka baabuurta loo jiido shabakada cinwaankeedu yahay [www.minneapolis.gov/impound](http://www.minneapolis.gov/impound) ama wac 311 ama 612-673-3000. U sheeg taarikada baabuurkaaga ama lambarka Vin-ka. Waxay kuu eegayaan in gaarigaaga la jiidey iyo in kale, waxay kaloo kusiin kuu sheegi karaan sida loo tago garaashka baabuurta loo jiido eek u yaala 51 Colfax Ave. N.

## ***Sidee baan baabuurkayga ugala soo bix karaa garaashka baabuurta loo jiido?***

Waxaad bixinaysaa khasiraad ah jiiditaanka iyo tikidhka lagu siiyey. Waxaa dhici karta in aad bixisid kharash ah intii la hayey ee uu ku jirey garaashka. Waxaad waci kataa 311 si aad u ogaatid lacagta lagaaga baahanyahay si aad baabuurka ula soo baxdid. Garaashku waxuu qaataa oo ogolyahay in aad lacagta ku bixisid kaash, jeeg, money orders, Visa, MasterCard iyo American Express. Internetka inaad ku bixisid si hawsha laguugu dedejiyo waa kuu banaantaay. Ka fiiri baabuurkaaga garaashka baabuurta loo jiido shabakada cinwaankeedu yahay [www.minneapolis.gov/impound](http://www.minneapolis.gov/impound) ama wac 311 ama 612-673-3000 waxii macluumaad dheeraad ah ee aad u baahantahay.



[www.minneapolis.gov](http://www.minneapolis.gov) • Wac 348-SNOW (7669)

Markuu barafku da'o, xasuusnow inaad xaaqdo iridda gurigaaga.  
Waa sida sharciga ah iyo deriswanaagga ay tahay inaad samayso.  
[www.minneapolis.gov/snow/shovel](http://www.minneapolis.gov/snow/shovel)